

Dhuun Xanuun (Strep Throat)

Gacaliye Waalid/daryeele: Arrinta dhuun xanuun qandho leh ayaa lagu tilmaamay lagana daweeyey fasalka cunugaaga. Arrimaha sida wanaagsan loo daweeyo ayaan innaba la is-qabadiin Karin. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaan doonaynaa inaad ogaataan waxayaabaha soo socda:

Sababta (Cause)	Dhuun Xanuunka iyo dhuun xanuunka firiirica leh iyo qandhada casaanka dhalaalaya leh (scarlet fever) ayaa caadi u ah is-qabadiinta caruurta bakteeriyada.
Astaamaha (Symptoms)	<p><u>Dhuun xanuunka (Strep throat)</u> – Cunugaaga ayaa qabi kara xummad si dhakhsa leh u bilaabata, dhuunto oo xanuun la casaata, iyo qanjidho bararsan. Madax xanuun ayaa jiri kara. Ilmaha ayaa qabi kara calool xanuun iyo matagid.</p> <p><u>Qandho casaan dhalaalaya (Scarlet fever)</u> – Dhif ah, firiiric ayaa ka soo baxa, isla markaasna dhuunta ayaa qandhoota. Firiirica ayaa noqon kara mid adag oo xanaf leh. Firiirica ayaa inta badan ka soo baxa luqunta iyo xabadka, xusulka iyo gumaarka iyo gol jilicyada bowdyaha iyo kilkilaha. Dabadeedna, maqaarka faraha foodooda iyo suulasha oo maqaarku ka dhaco. arely,</p> <p>Hadii cunugaaga la qabadiiyo, waxay qaadan kartaa 2 ilaa 5 maalmood in astaamuhu ku bilawdaan.</p>
Faafid (Spread)	Qufac iyo hindhiso.
Mudadada Khatarta (Contagious Period)	Ilaa iyo 24 saac kaddib marka dawaynta qandho jabiyuhua bakteeriyadu bilawdo.
Wac Daryeel-caafimaad Bixiyahaaga (Call your Healthcare Provider)	Hadii qof hoygiina joogo uu qabo astaamahaasi. Takhtarka ayaa samayn kara hubin shay bar isla markaasna siin kara qan jabiye bakteeriyada..
Ka reebid (Exclusion)	<p>Ma loo baahan yahay in guriga la joogo?</p> <p>Haa, ilaa 24 saac kaddib marka dawaynta bakteeriyada diluhu bilaabatom, xummaduna ka jabto. Ilmaha laga helo qandhada, laakiin aanay ka muuqan calaamaduhu uma baahna in la karantiilo. Lagama yaabo inay fidiyaan ama qabadii yaan dadka kale.</p>
Ka hortagga (Prevention)	<ul style="list-style-type: none">• Dabool afka iyo sanko marka aad qufacayso ama hindhisayso. Isticmaal istaraasho ama shaarkaaga gacmihiisa. Tuur istaraashada la isticmaalay.• Gacmaha dhaq kaddib marka aad taabato shay kasta oo waxyeelayn kara waxyaabaha sanko ama afka ka yimid. Cunugaaga ayaa laga yaabaa inuu kaaga baahan yahay inuu ku caawinto gacmo dhaqashada.• Weligaa cidna ha la wadaagin weelaha wax lagu cabo, koobabka iyo wiciyadaha. Ku dhaq dhammaan weelasha saabuun iyo biyo kulul marka la isticmaalo kaddib.• Nadiifi isla markaasna buufi shay kasta oo u soo dhawaan karay sanko iyo afka (gaar ahaan tooyada afka lagu taabto). Isticmaal waxyaabaha dila jeermiga.

La soo socodsii warbixinta Is-nidaamiska Xafiiska Caafimaadka Dugsiga. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka wac Waaxda Caafimaadka Bulshada Degmada Hennepin lam. (612) 543-5230.

